

— 150 —

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 7 ee 20 Jan. 1988, Meel-
marjin Heshiis (Code Of Conduct For Liner Conferences)

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qod. 82aad.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 22 ee 10.10.87, oo Dawl-
adda Soomaalijyeed ku oggolaatay meelmarinta heshiiska
Qaramada Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United
Nations Convention on a Code of Conduct for Liner Con-
ferences).

MARKUU GAROWSADAY: Talo soo jeedinta Wasiirka Wa-
saaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeer Sharcigan Soo Socda:

Qodobka 1aad

Kala Qaybsashada Xamuulka (General Cargo)

Kala qaybsashada Xamuulka (General Cargo) Gaadiidka
Badda waxaa lagu maamulayaa nidaamka 40%-40%-20 sida
uu farayo qod. 2aad qaybta 4aad xarafka (a iyo b) ee heshiis
ka Qaramada Midoobay ee Gaadiidka Badaha (The United
Nations Convention on a Code of Conduct for Liner Confe-
rences) oo lagu guddoonsaday Jeneefa 6dii Abriile 1974, kana
dhexeeya Wadamada xubnaha ka ah Qaramada Midoobay ee
meel mariyey isla heshiiskaa oo Soomaaliya ka mid tahay
sida ku cad sharciga lam. 22 ee 10kii Okt. 1987.

Qodobka 2aad

A W O O D S I I N

Wasiirka W/Gaadiidka Badda iyo Dekadaha waxaa awood
loo siinayaa inuu dekreeto ku magacaabi karo hay'adda Soo-
maajiya u maamuleysa qaybteeda kaga soo taasi karta qod.
1aad ee Xeerkan.

Qodobka 3aad

Habka Fob iyo C&F

Xamuulka Ganacsiga oo dalka la keenay ama laga dhaa
finayo laguna qaadayo gaadiid badeed, waxaa lagu maamula

— 151 —

yaa habka FOB (Free on board) marka dalka la keenayo iyo habka C&F (Cost and Freight) marka dalka laga dhoofinayo

Qodobka 4aad

Gaadiidka Xamuulka

1. Xamuulka Dawladda iyo hay'adaha madax bannaan ee Qaranka waxaa lagu keenayaa laguna dhoofinayaa Maraa kiibta Shirkadda Gaadiidka Badda Soomaaliyeed iyo kuwa ay maamusho ama soo ijaarato.

2. Heshiisyada (L/C) ganacsatada gaarka ah oo la xiriirra keenista iyo dhoofinta xamuulka gaadiidka badda waa inay waafaqsanaadaan nidaamka ku xusan qod. 1aad ee Xeerkan.

Qodobka 5aad

R U Q S A D

Shirkadda Gaadiidka Badda Soomaaliyeed waa inay bixiisaa ruqsad, markii aysan suurtagal u ahayn keenista iyo dhoofinta xamuulka ku xusan qod. 4aad ee Xeerkan.

Qodobka 6aad

C I Q A A B

Hay'ad iyo Ganacsato kasta oo ku xadgudba nidaamka ku xusan qodobka 1aad, 3aad iyo 4aad ee Xeerkan, waxaa lagu Ciqaabayaa Ganaax u dhexeeya 5% ilaa 15% qiimaha ba deecada, iyadoo laga eegayo ficilka uu ku kacay lahaystuhu.

Qodobka 7aad

Wasiirka W/Gaadiidka Badda iyo Dekadaha waxaa awood loo siiyay meelmarinta Xeerkan isagoo kaashanaya Guddiga Nooliga iyo Barka Xamuulka Gaadiidka Badda.

Qodobka 8aad

Dhaqangal

Xeerkan wuxuu dhaqan gejayaa markuu saxiixo Madax weynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmi ga ah ee J.D. Soomaaliya.

Muqdisho, 20.1.1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.